

## Warqadda La-Talinta Aragga Midabka

Magaca Ilmaha \_\_\_\_\_ Da'da/Taariikhda Dhalashada \_\_\_\_\_

Waalidka/Daryeel-bixiyaha Sharafta leh,

Inta lagu jiray baaritaanka aragga ee dhowaan dugsiga lagu sameeyay, ilmahaaga ayaa ku dhibtooday aqoonsiga midabada kala duwan. Tani waa baaritaanka aragga; waxay keliya tuseysa in ilmahaaga u dhibaato ka qabo aragga midabka.

Waa kuwaan maclumaaad ku saabsan dhibaatooyinka aragga midabka:

- Baaritaanka khabiirka indhaha looma baahno balse waxay kaa caawin kartaa in ay jirto dhibaato dhanka aragga midabka.
- Carruurta waxay isticmaalaan tilmaamo si ay u gartaan midabada, inta badan carruurta ay dhib ku tahay in ay arkaan midabada ma'ahan dhibaato.
- Cilmi-baarista waxay muujinaysaa in aysan jirin farqi weyn oo u dhexeeya guusha dugsiga ee ilmaha leh aragga caadiga ah ee midabka iyo kuwa leh dhibaatooyinka midabka.
- Inta lagu jiro sanadaha hore ee dugsiga, midabada waxaa loo isticmaali karaa in lagu barto xisaabta iyo casharrada kale. Ogaanshaha in ilmahaaga ay dhibaato ka haysato aragga midabka waxay macalinka ilmahaaga ka caawin kartaa in uu helo habab kale oo uu ku baro casharradaan.
- Haddii ilmahaaga u baahan yahay caawin xagga dugsiga maaddama ay dhibaato ka haysato aragga midabka, la xiriir macalinka ilmahaaga.
- Xirfadaha qaarkood waxay u baahan yihiin awoodda lagu kala saaro midabada, sidaas darteed tani waa muhiim in aad ogaato inta u ilmahaaga sii weynaanaayo.
- Haddii aad qabto su'aalo kale oo ku saabsan aragga midabka ee ilmahaaga, ama aad u baahan tahay in lagaa caawiyo in aad hesho baaritaan xirfadlahaa indhaha, fadlan la xiriir

School Nurse: \_\_\_\_\_ Phone: \_\_\_\_\_

Email: \_\_\_\_\_ Date: \_\_\_\_\_

Foomka waxaa ku diyaariyay:

Waaxda Caafimaadka ee Minnesota  
Baaritaanka Carruurta iyo Dhallinta  
651-201-3650  
[health.childteencheckups@state.mn.us](mailto:health.childteencheckups@state.mn.us)  
[www.health.state.mn.us](http://www.health.state.mn.us)

12/2023

*Si aad xogtaan ugu hesho qaab kale, la xiriir: 651-201-3650.*